



Oggolaashadaada

Brograamka Tallaalka Dowladda (RVP) waxaan carruurta kaga difaaceynaa cudurrada daran ee faafa. Hey'adda Caafimaadka Dadweynaha iyo Dabecadda (RIVM) ayaa RVP isku duba ridday. Daryeelka Caafimaadka Dhallinta (JGZ) ayaa nawaaxiga ka hirgelisa tallaalada. Tusaale ahaan sida xafiiska la socodka carruurta ama hool isboortiga ku fuliya.

Sida uu sahciga qabo RVP waa in ay adiga oggolaasho ku weydisataa. Halkan ayaan kugu sharraxeynaa sida ay tahay.

Laba oggolaasho oo RVP

Sida sharciga uu qabo laba oggolaasho ayaa loo baahan yahay:

- siismada tallaalada, iyo
- is weydaarsiga macluumaadka dhexmaraaya JGZ iyo RIVM.

Waa muhiim in aad fahamto oggolaashayaasha waxa ay ku saabsan yihiin. Sidaa awgeed ayeey RIVM kuugu soo raacisaa mar kasta casumadda-tallaalka buug warbixineed. Adiga heeysta warbixinta buuggaasi waxa aad iskaada u go'aansan kartaa in aad oggolaasho bixiso ama diido. Inta aad booqaneyso JGZ waxa uu dhakhtarka dhallinta- ama kalkaalisada caafimaad kaaga warbixinayaan tallaalka iyo maxaad filan kartaa. Markaa adigana su'aalo ayaad weydiin kartaa. Keddibna dhakhtarka dhallinta- ama kalkaalisada caafimaad waxa ay ku weydiinayaa oggolaashadaada. oggolaashada cod ahaan ayaad u siin kartaa dhakhtarka dhallinta- ama kalkaalisada caafimaad. Looma baahna in aad saxiixdo. Oggolaashada waxa ay u shaqeyneeyso RVP gebigeedaba. Go'aankaada wakhti kasta ayaad ka noqon kartaa, haddii aad doonto. Waxaad taasi u sheegi kartaa JGZ.

Yaa bixin kara oggolaasho?

cidda ay JGZ weydiineyso oggolaasho waa mid ku xiran da'da ilmaha:

- waxa quseeya carruurta ilaa iyo 12 sano jirka waxaan oggolaashada ka codsaneynaa waalidka (wasalidiinta),
- waxa quseeya carruurta 12 ilaa iyo 16 sano jirka waxaan oggolaashada ka codsaneynaa waalidka (wasalidiinta), iyo ilmaha, iyo
- da'da 16 sano iyo ka weyn waxaan oggolaashada ka codsaneynaa ilmaha.

Waa sida sharciga uu qabo.

muxuu ku saabsan yahay oggolaashada is weydaarsiga macluumaadka dhexmaraaya JGZ iyo RIVM?

Haddii aad oggolaasho tallaaliid bixisay laguna siiyay tallaalkii, JGZ macluumaadka tallaalka si wacan ayeey uu diiwan gelineysaa. Waa macluumaad quseeya tallaalka la siiyay noociisa. Iyo halkee iyo goorma ayeey taasi dhacday.

RIVM

A. van Leeuwenhoeklaan 9
3721 MA Bilthoven
Postbus 1
3720 BA Bilthoven
www.rivm.nl

T +31 88 689 8989
info@rivm.nl

JGZ waxa ay macluumaadkaasi u gudbineysaa RIVM. Waayo RIVM waxa ay macluumaadka u adeegsanaysaa si ay RVP iskuugu duba riddo. Ayna la socoto in brograamka uu si wacan u hawl galay.

Macluumaadka tallaalka JGZ mar kasta waa ay u gudbineysaa RIVM. Haddii aad oggoshahay, waxa ay JGZ u gudbineysaa RIVM xitaa macluumaadka shaqsiga. Macluumaadka shaqsiga (magaca, ciwaanka, magaalada degaanka, nambarka adeegga bulshada (BSN), taariikhda dhalashada, jinsiga) JGZ iskama gudbin karto. Sidaa awgeeda waa in ay JGZ horta ay oggolaasho ku weydiiso. Is weydaarsiga macluumaadka tallaalka oo ay la socdaan kuwa shaqsiga oo dhexmara JGZ iyo RIVM faa'iddoyin badan ayuu leeyahay.

RIVM waxa ay wax ka qaban kartaa caafimaadkaada, haddii ay la socdaan tallaalada aad qaadatay:

- Kolkaa RIVM waxaad ka heli kartaa xusuusin tallal haddii aad tallalkaasi aadan weli qaadaniin.
- Waxaa kaloo xitaa aad RIVM si fudud uga codsan kartaa tirada guud oo tallaalada aad qaadatay. Tusaale ahaan haddii caddeynta tallaalada uu kaa lumay. Aragtidaa guud oo tallaalada aad qaadatay waxaa loogu baahan yahay mararka qaar safradda aad dibadda ku aadeyso. Waxaa kaloo uu adeegsan kartaa marka aad booqaneyso dhakhtarka (qooyaska) ama cisbitaalka.
- Waxaa barbar socda in ay RIVM dib u baareyso in aad tallaalka saxa ah qaadatay wakhtiga saxa ahaa.

RIVM waxay kareysaa xitaa in macluumaadka ay caafimaadka dadweynaha ku hagto oo kula socoto:

- Haddii uu nederland ka dilaaco cudur faafa? Isla markiiba RIVM waxay si la hubo u ogtahay tirada dadka difaac tallal leh. Iyo kuwa ay yihiin. Sidaas ayeey RIVM ku saadalin kartaa sida jirrada ay u faafi karto. Iyo in loo baahn yahay in tallabo laga qaado. Tusaale ahaan in dadka lagu casumo in ay qaataan tallaal (dheeraad ah).
- Waxaa barbar socda in RIVM ay la socoto tayyada RVP. RIVM waxay u kuur gashaa in ay ka helaan iyo inta ay la egtahay muddada tallalada ay siinayaa difaac wacan dadweynaha Nederland.